



DEGGENAYAASHA GURYAHA DARYEELKA AH EE LA KULMAYA BIXIN/KA-SAARID

Ogow Xuquuqdaada

Haddii aad ku nooshahay guri daryeelid, oo mararka qaarkood lagu magacaabo xarun daryeel oo xirfadle ah, waa wax muhiim ah inaad ogaato xuquuqdaada. Waxaa si gaar muhiim u ah in la ogaado goorta ay xarun ku saari karto, iyo xuquuqdaada la xiriira saaritaanka/bixinta.

GURYAHA DARYEELKA AXAY KELIYA KU SAARI KARAAN DEGGENAYAASHA SABABO GAAR AH

- Deggenayaasha guryaha daryeelka waxay ilaalin ka heleen sharciyada gobolka iyo federaalka. Taasi macnaheedu waa adigoo ah deggene guri daryeel eek u yaala Minnesota, waxaa keliya lagugu saari karaa lix sababood midkood:
 - Xarunta oo aan dabooli karin baahiyahaaga.
 - Dib dambe uma baahnid adeegyada xarunta daryeelka.
 - Waxaad khatar galinaysaa badbaadada dadka kale ee xarunta ku jira.
 - Waxaad khatar galinaysaa caafimaadka dadka kale ee xarunta jooga.
 - Waxaad bixin wayday kharashka lagaa rabo.
 - Xaruntu way xirmaysaa.

MAXAA LOO BAAHAN YAHAY IN LA RAADIYO MARKA UU GURI DARYEEL UU KU SAARAYO

- Haddii guri daryeel ku dhawaaqo inay ku saarayaan, waa inay buuxiyaan mid ka mid ah shuruudaha kor lagu xusay.
- Badanaa, guriga daryeelka waxay sheegayaan inaysan dib dambe u dabooli karin baahiyahaaga. Haddii ay arintu sidaa tahay:
 - Guriga daryeelka waa in ay diiwaangeliyaan oo ay sharxaan waxa ay qabteen si ay isugu dayaan in ay daboolaan baahiyahaaga, oo ayna sharxaan sida ay adeegyada xaruntaada cusub u dabooli doonaan baahiyahaaga.
 - Guryaha daryeelka badankood waxay ansax u haystaan inay bixiyaan daryeel isku mid ah, marka laga reebo in yar oo adeeyo takhasus gaar ah leh, xarumo badan waa inay awoodaan inay daboolaan baahiyaha deggenayaasha badankood.
- Guriga daryeelka uma sheegan karaan si sahlan in qof deggane ah uu “aad u dhib badanyahay”, “uga baahan yahay shaqaalaha daryeel badan”, ama “aad u kharash badan yahay” inay siiyaan daryeel.
 - Tusaale ahaan, deggenayaasha qaba cudurka maskax ilowga (dementia) badanaa way iska warwareegaan. Warwareega kuma filna xarun inay sheegato inaysan dabooli karin baahiyaha deggane.
- Guryaha daryeelka waa inay siiyaan ogeysiis 30 maalmood ah iyo qorshe siideen oo faahfaahsan degganaha ay saarayaan. Si taxaddar leh u fiiri sababta ama sababaha saaritaanka ay xarunta ku sheegtay ogeysiiska.



WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN AAD RACFAAN KA SAMEYSO SAARITAANKA

- Haddii aad hesho ogeysiis saaritaan, uma baahnid inaad isla markiiba gurto/baxdo, waxaana laga yaabaa inaysan qasab kugu ahayn inaad gurto/baxdo. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka sameyso saaritaanka.
- Racfaanka gudahiisa, waxaad ka doodi kartaa sababta ay guriga daryeelka ka sheegeen saaritaanka. **Waxaad xaq u leedahay inaad sii joogto xarunta inta uu rafcaanka socdo.**
- Racfaanada waxay noqon karaan wax aan sahlaneen oo wakhtiyeentiisa waa wax muhiim ah, laakiinse waxaad xaq u leedahay inaad caawimaad weydiisato. Haddii aad hesho ogeysiis ah saaritaan waa inaad **isla markiiba** la xiriirtaa mid ama in ka badan ee kuwa soo socda:

[Xarunta Caddaaladda Waayeelka Minnesota \(Minnesota Elder Justice Center\)](#) lambarka 651-440-9300

[Ombudsman for Long Term Care \(Xafiiska Baaritaaka Cabashada Daryeelka Muddada Dheer\)](#) lambarka 651-431-2555 ama 1-800-657-3591

[Law Help MN \(Caawinta Sharci ee MN\)](#) si aad u hesho xafiis caawin sharci ee maxalli ah

HADDII ISBITAAL LAGU GEEYO, WAXAAD XAQ U LEEDAHAY INAAD KU SOO LAABATO GURIGAAGA DARYEELKA

- Haddii ay kugu noqoto qasab inaad ka baxdo guriga daryeelka isbitaal dhigis darteed (ama sababo kale ee la xiriira daryeel), waxaad xaq u leedahay inaad ku soo laabato xarunta isbitaal dhigidda ka dib.
- Xaruntu waa inay ku siisaa macluumaad ku saabsan xuquuqdaada ku soo noqoshada, iyo sidoo kale nuqul ah siyaasadeeda ah sariir-u-qabasho/u-hayn.
- Haddii aad isku dayeyso inaad ku soo laabato oo xarunta ay aaminsan tahay inaysan dib dambe u awoodin inay ku daryeelaan, waa inay soo saartaa warqad saaritaan oo bixinaya dhammaan shuruudaha ogeysiiska looga baahan yahay (oo ay ka mid yihiin ogeysiis ah 30-maalmo, iyo xuquuqdaada rafcaanka), dokumentiyo, iyo macluumaadka looga baahan yahay sharciga.

QORSHAHA SAARITAANKA OO FAAHFAAHSAN

- Waxaad xaq u leedahay inaad kaqeybgasho qaybaha qorshaynta saaritaanka oo dhan. Qorshaha saaritaanka ee qoraalka ah waa inay ku jiraan goobta ku noolaata ee cusub, adeegyada, daryeelka, iyo daawooyinka, haddii loo baahdo.
- Xarunta waa inay kuu diyaariso oo ay kuu jihayso saaritaan ammaan leh oo habaysan ah oo lagu sheego luuqad iyo qaab aad fahmayso.
- Waad codsan kartaa inaad booqato guriga cusub ee lagu soo jeediyay. Tani waxay ka mid tahay jihaynta looga baahan yahay inuu bixiyo guriga daryeelka.
- Waa inaad codsataa sharxaad faahfaahsan oo ku saabsan sida guuritaanka u dhici doono. Waa mas'uuliyadda xarunta inay hubiso inaad nabad ku tagto goobtaada cusub adigoo wata alaabta aad leedahay, ay ka mid tahay wareejinta wixii lacag shaqsiyeed ah ama akoon cusub.

KA ILAALINTA SAARITAANKA XILLIGA CUDURKA AAFADA AH

Tan iyo bilowgii cudurka aafada ah, waxaa jiray xeerar gaar ah oo ku saabsan saaritaanka. Xeerarkani waxay khuseeyaan ka saaritaanada guriga daryeelka. Marka laga reebo duruufo kooban, guriga daryeelka kaama saari karo goobtaada illaa marka la beddelo ama ay dhamaato ilaalintaas.



Xuquuqaha Deggenaansha Kale ee Guryaha Daryeelka

- Waxaad xaq u leedahay inaad kaamaro dhigato qolkaaga haddii aad raacdo tilmaamaha ku qoran foomamka oggolaanshaha ee laga heli karo [Websaydka Minnesota Department of Health](#).
- Guriga daryeelka waa inuu fuliyaa baahiyahaaga iyo dookhaaga/doorbidaada. Tani macnaheedu waxay tahay waa inay isbeddel macquul ah ku sameeyaan xeerarkooda sida oggolaanshaha wakhti cunto ama wakhti jiifsasho ee duwan haddii ay yeelida sidaa ay ku caawin doonto.
- **Guri daryeel kuguma sameyn karo kaa aargoosasho.** Tusaale ahaan, ma soo saari karaan ogeysiis saaritaan sababtiisu tahay inaad ku doodayso inaad hesho daryeel sii wanaagsan, ama kuu diidaan inaad adiga ama dadka ku caawinaya inaad ka qaybgashaan kulan ah qorsheynta daryeel.

Wixii ku saabsan liiska dhameystiran ee xuquuqda deggenayaasha guryaha daryeelka, dib-u-eeg [Minnesota Department of Health Combined Federal and State Bill of Rights \(Sharciga Xuquuqda ee Isku-jira ee Federaalka iyo Gobolka ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota\)](#).

Maxaa dhacaya haddii aan ku noolahay Xarun Nolasha Caawinta Leh?

Xeerarka xarumaha nolasha caawinta leh ee ku saabsan saaritaanka waxaa la beddelayaa bisha Ogosto 1, 2021. Iyada oo aysan isku mid ahayn, deggenayaasha ku nool xarun nolasha caawinta leh waxay lahaan doonaan xuquuq la mid ah deggenayaasha guryaha daryeelka marka laga hadlayo saaritaanka, joojinta, ama qasab uga saarista. Haddii lagu saarayo, lagaa joojinayo, ama qasab lagaaga saarayo xarun nolasha caawinta leh ama aad qabto su'aalo ku saabsan xuquuqdaada, kala xiriir [Ombudsman for Long Term Care \(Xafiiska Baaritaaka Cabashada Daryeelka Muddada Dheer\)](#) lambarka 651-431-2555 ama 1-800-657-3591; ama [Minnesota Elder Justice Center \(Xarunta Caddaaladda Waayeelka ee Minnesota\)](#) lambarka 651-440-9300.

Linkiyada/xiriirada Tixraaca

XIRIIRADA/LINKIYADA BOGGA 2:

[Minnesota Elder Justice Center. \(Xarunta Caddaaladda Waayeelka ee Minnesota\)](https://elderjusticemn.org/our-services/victim-services/) -

<https://elderjusticemn.org/our-services/victim-services/>

[Ombudsman for Long Term Care \(Xafiska Baaritaaka Cabashada Daryeelka Muddada Dheer\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4732-ENG) -

<https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4732-ENG>

[Law Help MN \(Caawinta Sharci ee MN\)](https://www.lawhelpmn.org/lawhelpmn-guide) - <https://www.lawhelpmn.org/lawhelpmn-guide>

XIRIIRADA/LINKIYADA BOGGA 3:

[Minnesota Department of Health \(Waaxda Caafimaadka ee Minnesota\)](https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/emonitoring/index.html) -

<https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/emonitoring/index.html>

[Minnesota Department of Health Combined Federal and State Bill of Rights \(Sharciga Xuquuqda ee Isku-jira ee Federaalka iyo Gobolka ee Waaxda Caafimaadka ee Minnesota\)](https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/billofrights/docs/borcombined_eng_reg.pdf) -

https://www.health.state.mn.us/facilities/regulation/billofrights/docs/borcombined_eng_reg.pdf

[Minnesota Elder Justice Center. \(Xarunta Caddaaladda Waayeelka ee Minnesota\)](https://elderjusticemn.org/our-services/victim-services/) -

<https://elderjusticemn.org/our-services/victim-services/>

[Ombudsman for Long Term Care \(Xafiska Baaritaaka Cabashada Daryeelka Muddada Dheer\)](https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4732-ENG) -

<https://edocs.dhs.state.mn.us/lfserver/Public/DHS-4732-ENG>